# Hagitaanka Tixraaca Wicitaanka

## Xaqiijinta Booqashada Cayiman (FVV)

**Lambarka Aqoonsiga Shirkada 2-91496**

**Lacag La'aanta ah ee TVV/FVV:**
- 844-769-5920
- 855-792-3524

| Aqoonsiga SANTRAX | Aqoonsiga Macmiilka |
| --- | --- |
| | |

**Soo Galinta Wicitaan**
Marka aad imaanayso guriga macmiilka, hubi inaad haysatid macluumaadka soo socda:
- Aqoonsigaaga Santrax
- Aqoonsiga Macmiilkaaga
- Lambarka lixda god ah ee koobaad ee lambarka xaqiijinta booqashada oo ka dhigan taariikhda iyo wakhtiga imaatinka (la helay bilowga booqashada).
- Lambarka lixda god ah ee labaad ee lambarka xaqiijinta booqashada oo ka dhigan taariikhda iyo wakhtiga bixitaanka (la helay dhamaadka booqashada).

**Marka La Imaado**
Markaad timaado guriga macmiilka, riix oo sii daa badhanka xagga hore ee Aaladda FVV oo qor lambarka xaqiijinta booqashada lixda god ah ee ugu horreeya ee ka muuqda shaashadda aalada. Waxaad u isticmaali doontaa lambarkaan hadhow si aad u wacdo Santrax. Ogoow taariikhda iyo wakhtiga aad riixday badhanka.

**Kahor Tagitaanka**
Dhamaadka booqashada, riix oo sii daa badhanka xagga hore ee Aaladda FVV oo qor lambarka xaqiijinta booqashada lixda god ah ee ugu horeeya ee ka muuqda shaashadda aalada. Waxaad u isticmaali doontaa lambarkaan hadhow si aad u wacdo Santrax. U fiirso taariikhda iyo wakhtiga aad riixday badhanka, iyo sidoo kale adeegyada EVV ee loo qabtay tookadaas.

**Fiiro Gaar ah:** Haddii aad u baahan tahay in aad isla markiiba aragto lambarka, waxa aad riixi kartaa oo aad sii deyn kartaa badhanka hal mar oo kale si uu u muuqdo oo aad u akhris. Haddii aad hesho lambar ka duwan, taasi waa caadi, isticmaal lambarka cusub.

iLIFE waxay samaysay aalad wax ku ool ah oo lagu ilaalinayo macluumaadka FVV - Foomka Xaqiijinta Booqashada ee Cayiman (FVV), kaas oo laga heli karo webseedkeena barta:
**IRIS:** https://ilife.org/evv/iris-evv-information-and-training/
**Family Care:** https://ilife.org/evv/family-care-evv-information-and-training/

*Fiiro Gaar ah: Uma baahnid inaad u gudbiso foomkaan iLIFE, laakiin waxaan kugula talineynaa inaad xafido xogtaada.*

**Waxyaabahan soo socda maskaxda ku hay:**
- Ha wicin Santrax ilaa ugu yaraan 15 daqiiqo kadib markaad hesho lambarka lixda god ah ee labaad dhamaadka booqashadaada.
- Waa inaad wacdaa Santrax todobo maalmood gudahooda ee billoowga booqashada.
- Uma baahnid inaad ku sugto goobta macmiilka si aad u wacdo.
- Labada lambar ee lixda god ah ee xaqiijinta booqashadaayaa la galin doonaa hal wicitaan oo Santrax ah.

1. **Wac mid ka mid ah lambarada lacag la'aanta ah ee ay leedahay iLIFE: 844-769-5920 ama 855-792-3524**
   Haddii aadan awoodin inaad hesho lambarka lacag la'aanta ah ee ugu horeeya, fadlan isku day lambarka labaad ee lacag la'aanta ah.

   **Nidaamku wuxuu ku bilaabmi doonaa isagoo kusoo saaraya inaad doorato luuqad.**

   ***Santrax waxay dhihi doontaa:*** "Si aad u doorato Ingiriisi, fadlan riix hal (1). Si aad u doorato Carabiga Masar, fadlan riix labo (2). Si aad u doorato Burmese, fadlan riix saddex (3). Si aad u doorato Shiinays Mandarin, fadlan riix afar (4). Si aad u doorato Faransiis, fadlan riix shan (5). Si aad u doorato Hindi, fadlan riix lix (6). Si aad u doorato Hmong, fadlan riix todobo (7). Si aad u doorato Luuqada Laotia, fadlan riix sideed (8). Si aad u doorato Nepali, fadlan riix sagaal (9). Si aad u doorato Luuqada Ruushka, fadlan riix toban (10). Si aad u doorato Luuqada Serbia, fadlan riix koow iyo toban (11). Si aad u doorato Somali, fadlan riix labo iyo toban (12). Si aad u doorato Isbaanish, fadlan riix saddex iyo toban (13). Si aad u doorato Sawaaxili, fadlan riix afar iyo toban (14). Si aad u doorato Fiyaatanaamiis, fadlan riix shan iyo toban (15). Wicitaanada soo baxa waxaa lagu maqlaa luuqadaas.

2. **Riix lambarka u dhigma luuqada aad rabto inaad maqasho.**
   Luuqada aad doorato waxay noqon doontaa luuqadda inta inta kale ee wacitaanka lagu maqlo.
   ***Santrax waxay dhihi doontaa:*** *"Soo dhawoow, fadlan geli aqoonsigaga Santrax."*

3. **Riix Lambarada Aqoonsigaaga Santrax ee taleefanka codka taabashada.**
   ***Santrax waxay dhihi doontaa:*** *"Midan ma booqasho koox ahaaneed miyaa? Riix (1) si aad u doorato Haa ama (2) si aad u doorato Maya"*

iLIFE
Choice. With Confidence.

# Hagitaanka Tixraaca Wicitaanka

## Xaqiijinta Booqashada Cayiman (FVV)

**Lambarka Aqoonsiga Shirkada 2-91496**

**Lacag La'aanta ah ee TVV/FVV:**
- 844-769-5920
- 855-792-3524

4. **Riix labo (2) Si aad ugu biirto booqasho aan ahayn mid kooxeed.**
***Santrax waxay dhihi doontaa:** "Fadlan dooro goobta adeegaaga. Riix hal (1) si aad u doorato Guriga, Riix labo (2) si aad u doorato Bulshada, Saddex (3) si aad dib ugu daarto."*

5. **Riix hal (1) si aad u doorato Guriga, taabo labo (2) si aad u doorato Bulshada. Riix saddex (3) si aad dib ugu daarto.**
***Santrax waxay dhihi doontaa:** "Haddii tani ay tahay Xaqiijinta Booqasho Cayiman iyadoo la isticmaalayo qalabka FVV, taabo badhanka calaamada (*) si aad u geliso lambarada xaqiijinta booqashada. Haddii kale, riix badhanka pound (#) si aad u sii wadato."*

6. **Riix badhanka pound (*) si aad u sii wadato.**
***Santrax waxay dhihi doontaa:** "Fadlan geli aqoonsiga macmiilka koowaad."*

7. **Geli Aqoonsiga Macmiilka.**
***Haddii aqoonsiga macmiilka si khaldan loo galiyo, Santrax waxay dhihi doontaa:** "Ma jiro FVV diiwaangashan, fadlan dib u geli aqoonsiga macmiilka ama riix badhanka pound (#) si aad u sii wado."*

***Haddii aqoonsiga macmiilka si sax loo galiyo, Santrax waxay dhihi doontaa:** "Fadlan geli lambarkaaga xaqiijinta booqashadaada koowaad ama riix badhanka pound (#) si aad u sii wado."*

8. **Geli lambarka xaqiijinta booqashada koobaad.**
Midani waa lambarka ugu horeeya ee lix-god ah oo aad ka heshay Aaladda FVV markii aad timid guriga macmiilka oo waxay u taagan tahay wakhtigaaga.

***Haddii lambarka xaqiijinta booqashada si sax loo galiyo, Santrax waxay dhihi doontaa:** "Lambarka xaqiijinta booqashada koobaad waa (TAARIIKHDA/WAKHTIGA). Hadday tani khalad tahay, riix 1 si aad dib isugu daydo ama riix badhanka pound (#) si aad u sii wado."*

**Fiiro Gaar ah:** Dhagayso si aad u hubiso in taariikhda iyo wakhtiga la bixiyay ay la mid yihiin taariikhda iyo wakhtiga badhanka aalada la riixay. Haddii ay iswaafaqi waayaan, lambar khaldan ee xaqiijinta booqasha ayaa la galiyay. Riix 1 si aad dib ugu geliso lambarka.

9. **Riix badhanka pound (#) si aad u sii wadato.**
***Santrax waxay dhihi doontaa:** "Fadlan geli lambarkaaga xaqiijinta booqashadaada labaad ama riix badhanka pound (#) si aad u sii wado."*

10. **Geli lambarka xaqiijinta booqashada labaad.**
Kani waa lambarkii labaad ee lix-god ah ee aad ka heshay Aalada FVV dhamaadka booqashada. Waxay ka dhigantahay wakhtiga aad baxayso.

***Haddii lambarka xaqiijinta booqashada si sax loo galiyo, Santrax waxay dhihi doontaa:** ""Lambarka xaqiijinta booqashada labaad waa (TAARIIKHDA/WAKHTIGA). Haddii ay tani khalad tahay, riix 1 si aad dib isugu daydo ama riix badhanka pound (#) si aad u sii wado."*

11. **Riix badhanka pound (#) si aad u sii wadato.**
***Santrax waxay dhihi doontaa:** "Fadlan geli aqoonsiga adeega."*

12. **Riix lambarka Aqoonsiga ee Koodhka Adeegga ee aad samaysay.**
Hoos ka eeg liiska koodhka adeegga iLIFE.

| Koodhka Adeegga | Barnaamijka | Koodhka Wiciaanka |
|---|---|---|
| T1019 | IRIS iyo Daryeelka Qoyska | 10 |
| T1020 | Daryeelka Qoyska Kaliya | 25 |
| S5125 | IRIS iyo Daryeelka Qoyska | 15 |
| S5216 | IRIS iyo Daryeelka Qoyska | 20 |
| COMBO | IRIS Kaliya | 30 |

**Fadlan ogaw: COMBO waxaa kaliya oo loo isticmaalaa barnaamijka IRIS kadib cusboonaysiinta dhaafitaanka 2021, iyo kaliya haddii labada nooc ee adeegyada lagu bixiyo isla wakaalada adeeg bixiye.**

***Santrax waxay dhihi doontaa:** "Waxaad galisay (ADEEGA). Fadlan riix (1) si aad u aqbasho, (2) si aad dib iskugu daydo."*

13. **Riix badhanka hal (1) si aad u aqbasho, ama riix badhanka labo (2) si aad dib isugu daydo.**

14. **Hadda waad goyn kartaa wicitaanka.***
***Fadlan ogaw: IRIS iyo shaqaalaha barnaamijka Daryeelka Qoyska uma baahna inay dhamaystiraan hawlaha iyo xaqiijinta macmiilka.***

iLIFE
Choice. With Confidence.

# Hagitaanka Tixraaca Wicitaanka

## Xaqiijinta Booqashada Cayiman (FVV)

**Lambarka Aqoonsiga Shirkada 2-91496**

**Lacag La'aanta ah ee TVV/FVV:**
- 844-769-5920
- 855-792-3524

***Badal ahaan:**

***Santrax waxay dhihi doontaa:*** *"Geli tirada hawlaha"*

**Riix badhanka (0) si aad ugu gudubto su'aashan**
***Santrax waxay dhihi doontaa:*** *"Waxaad galisay (0) hawl(ood). Si aad u duubto codka macmiilka fadlan riix (1) oo u dhiib taleefoonka macmiilka, ama riix (2) haddii macmiilku aanu awoodin inuu ka qaybqaato."*

**Riix badhanka (2) si aad ugu gudubto su'aashan.**
***Santrax waxay dhihi doontaa:*** *"Mahadsanid, macasalaamo"*

**Hadda waad goyn kartaa wicitaanka.**

### Macluumaadka Adeega Macmiilka

**IRIS**
Talefoonka: 888-800-5599
Iimaylka: IRIS.EVV@iLIFE.org

**Family Care**
Taleefoonka: 888-490-3966
Iimaylka: FC.EVV@iLIFE.org

**Macluumaadka iyo Agabka Tababarka iLIFE EVV**
https://ilife.org/evv/evv-information-and-training/

iLIFE
Choice. With Confidence.